Sharciga sinnaanta

- sanduuqa qalabka la dagaalanka takooridda



Moninaisuuden puolesta Syrjintää vastaan

SEIS – Suomi Eteenpäin Ilman Syrjintää

Maajo 2004
Qoraalkan waxaa sameeyey mashruuca SEIS – Suomi Eteenpäin Ilman Syrjintää (Mashruuca SEIS – Finland takoorid la'aan bay hore u socotaa).
Fiiri. http://www.join.fi/seis
Qoraalkan waxaa lagu diyaariyey caawimadabarnaamijka waxqabadka bulshada ee ka hortagga takooridda / With the contribution of the European Community Action Programme to combat discrimination

Sawirada: Fabrizio Scarpati

Tusmo

1. Sharciga sinnaanta – yuu saameeyaa? 4
2. Sharciga taariikhdiisa 4
3. Waa maxay takooriddu? 5
4. Maxaa sharciga lagu loo isticimaalaa)? 7
5. Horumarinta sinnaanta 9
6. Ilaalinta fulinta sharciga 11
7. Qofka la takooray xaalmarin buu xaq u leeyahay 12
8. Falanqaynta arrimaha takooridda oo kooban – xaggee wax laga bilaabaa? 13
9. Faahfaahin dheeraad ah 16

LIfAAQYO:

Lifaaqa 1aad Fikrado ku saabsan Sharciga sinnaanta – saddex tusaale
Lifaaqa 2aad Xubnaha guddiga takooridda

1. Sharciga sinnaanta – yuu saameeyaa?

Finland waxaa jira sharciyo badan oo qaranka ah lagu mabnuucayo takooridda, waxaan kaloo aqballay in aan tixgelino heshiisyo badan oo caalami ah oo horumarinaya sinnaanta. Sidaas ooy tahay, haddana waxaa jirta in maalin walba dad badan ay takoorid shaqada kula kulmaan ama wakhtiyada ay firaaqada yihiin.

Sharciga sinnaantana oo dhaqngalay bilowgii bishii Feebaraayo 2004 ayaa la rabaa inuu wax ka taro arrintan. Ujeeddada sharcigu waa in kor loo qaado sinnaanta, isla markaana la xoojiyo fursadda qofka takooridda la kulmay uu yeelanayo si uu ficil uga sameeyo sida xun ee loola dhaqmay.

Sharciga sinnaanta waxaa lagu mabnuucaa takooridda ku salaysan da'da, jinsiyadda ama asalka dhalashada hore, dhalashada, luuqadda, diinta, waxa la aamminsan yahay, fikradda, xaaladda caafimaadka, naafanimada, xagga isutagga sekshewalka qofku wuxuu jecel yahay (khaniis iwm.) ama wax kale oo qofka saameeya. (tusaale ahaan hantida qofka, uur, xiriirka qoys ahaaneed). Asalka dhalashada hore waxaa loola jeedaa dadka waddanka u soo guurey iyo qolyaha tiro ahaan yar ee weligood Finland deggenaa, kuwaas oo ah romanka, saamiga, tataarka, yuhuudda iyo qolyaha asalkooda hore Ruushka ka soo jeedo ee wadanka hore u deggenaan jirey. Sharcigu wuxuu saameeyaa dadka dhalashadoodu Finland tahay iyo kuwa Finland u soo guureyba dhammaantood carruur, dumar iyo ragba.

Sharciga waxaa ku cad takooriddu waxa ay tahay, iyo marka sharci ahaan la ogol yahay kala soocidda dadka. Qodobada ugu muiimsan ee cusboonaysinta sharcigu waa waajibaadka saaran shaqaalaha maamulka o ah inay sameeyaan qorshe sinnaanta ah oo kor u qaadaya sinnaanta jinsiyadaha kala duwan, iyo qodobka ah in qofka takoridda lagu sameeyey ay suuragal u tahay inuu helo xaalmarin iyo weliba waajibaadka soo caddaynta oo la qaybiyey.

Qoraalkani wuxuu si kooban uga hadlayaa waxyaabaha salka u ah Sharciga sinnaanta iyo waxyaabuhuu ka kooban yahay kuwa ugu muhiimsan. Qaybta lifaaqyada ah waxaa sharciga fikradooda ka dhiibanaya wakiilo ka kala socda Golaha Saame (Saamelaiskäräjät), Ururka Golaha Naafada (Vammaisfoorumi ry) iyo Ururka Sinnaanta Sekshiwalka (SETA ry - lifaaqa 1aad).
Ujeeddadu waa in qof walba o inaga mid ahi ogaado xuquuqdiisa iyo waajibaadka saaran iyo hababka la adeegsan karo ee takooridda wax laga qaban karo lagagana hortegi karo. Sinnaantu ma aha inay noqoto xuquuq ay dad kooban leeyihiin; waa inay noqotaa wax qof walba suuragal u ah.

2. Sharciga taariikhdiisa

Erayada furaha u ah: dastuurka, xeerarka cunsuriyadda iyo takooridda shaqada

Sharciga sinnaanta asalkiisu wuxuu ka soo jeedaa xeerarka sharciyada ee qaranka Finland. Dastuurka Finland wuxuu dhigayaa, inay sharciga hortiisa dadku isku xuquuq yihiin. Hadaanay jirin sabab raalli laga noqon karo, qofnaba si gaar ah loolama dhaqmi karo iyadoo sal looga dhigayo lab ama dheddig uu yahay, da'diisa, asalkiisa, luuqadiisa, diintiisa, wuxuu aamminsan yahay, fikraddiisa, xaaladdiisa caafimaad, naafonimadiisa ama wax kale oo qofka saameeya.

Dastuurka mooyaana waxaa kaloo takooridda lagu mabnuuucay kuwo ay ka mid yihiin sharciyada shaqada iyo xiriirka adeegga, sharciyada sinnaanta iyo ragga iyo sharciyada dembiyada.
Waxay kaloo Finland ballanqaaday heshiisyada caalamiga ah ee xuquuqda bini-aadanimada, sida heshiisyada guud ee ku saabsan xuquuqda shacabka iyo xuquuqda siyaasadda, Heshiiiska Xuquuqda Bini-aadanka ee Yurub iyo buugga aasaaska arrimaha bulshada ee Yurub.

Sharciga sinnaantu wuxuu sii adkaynayaa sharciga horumarinta sinnaanta wuxuuna keenayaa habab cusub oo wax lagaga qaban karo takooridda. Sharciga sinnaanta waxaa kaloo lagu fulinayaa xeerarka Golaha Yurub uu Finland waajibka kaga dhigay ee lagula dagaaölamayo takooridda ku salaysan asalka jinsiyadda (waxaa loo yaqaan xeerka cunsuriyadda = rasismidirektiivi) iyo takooridda shaqada (xeerka takooridda shaqada = työsyrjintädirektiivi).

3. Maxay tahay takooriddu?

Erayada furaha u ah: *takoorid aan dahsoonayn iyo takoorid dahsoon, qashqashaadid, amar ah in la takooro, ula dhaqmid si gaar ah oo sida caadiga ah ka sii fiican*

Sharciga sinnaantu wuxuu mabnuucayaa takooridda ay salka u yihiin qofka da'diisa, asalkiisa ama jinsiyadduu u dhashay, waddankiisa, luuqaddiisa, diintiisa, wuxuu aamminsan yahay, fikraddiisa, xaaladdiisa caafimaad, naafonimadiisa, nooca uu u jihaysan yahay sekshiwal ahaan lab/dheddig ahaan ama sabab kale oo qofka la xiriirta. Sharcigu wuxuu mabnuucayaa takooridda aan dahsoonayn (toos ah) iyo takooridda dahsoon (aan toos ahayn) iyo qashqashaadidda iyo amar ah in qof la takooro.

Takooriddu waa iyadoo dadka siyaabo kala duwan loola dhaqmo iyadoo sal looga dhigayo, maadaama ay koox bulsho oo gaar ah ka tirsan yihiin, tusaale ahaan waxay aamminsan yihiin diin gaar ah ama sekshiwal ahaan waxay ka tirsan yihiin qolo tiro yar. takooriddu waxay noqon kartaa hal eray oo gaar ah ama xaalad, ama waxaa keeni kara habka ay bulshadu u dhisan tahay.

Takooridda aan dahsoonayn macnaheedu waa, in qof loola dhaqmo si ka xun sida dadka kale loola dhaqmay ama loola dhaqmi lahaa xaaladdaas oo kale.

- Takooridda aan dahsoonayn waa tusaale ahaan, haddii makhaayad oo kale qofka asalkuu ka soo jeedo dartiis loo diido in loo adeego.

Takooridda dahsoon waa, marka qofka jagadiisu noqoto mid tan dadka kale ka liidata iyadoo sabab looga dhigayo sharci la leeyahay waa dhexdhexaad ama sabab kale ama nidaam la isticimaalo dartiis, iyadoo aanay jirin wax sabab ah oo la aqbali karo oo sharcigaas ama nidaamkaas sal u ah.

- Takooridda dahsoon waxaa ka mid ah, haddii marka dad la shaqaalaynayo la yiraahdo qofku waa inuu luuqadda Finnishka si buuxda u yaqaan, xitaa iyadoo shaqada la qabanayo darteed aan loo baahnayn luuqadda oo buuxda.

Qashqashaadidda waxaa loola jeedaa haddii qof ama koox dad ahsumcadooda ama xuquuqdooda si ula kac ah loogu ama xadgudub ah wax loogu geysto iyadoo ay sal u tahay wax takoorid ah oo la mabnuucay, wax u geysashadu waxay noqon kartaa in la abuuro hanjabaad, colaad, yasid, deegaan fadeexad ama dagaal leh. Sharcigu wuxuu mabnuucayaa qashqashaadidda ula kaca ah iyo habka keeneya in cid dhibaato loo geysto.

- Tusaale ahaan kaftanada cunsuriyadda ah ee sida ula kaca ah loo sheegaa ama qof shaqaale ah oo xagga sekshiwalka koox tira yar ka tirsan oo la caayaa waxay ka mid yihiin tusaale ahaan qashqashaadadda.

Sharcigu wuxuu sidoo kale mabnuucayaa tilmaamidda ama amarka takooridda ah. Qofna ma aha inuu qof kale amar ku siiyo inuu takoorid sameeyo.

- tusaale amarka takooriddu wuxuu noqon karaa, haddii qofka makhaayadda iska leh shaqaalaha ku yiraahdo dadka asalkoodu cidaas yahay yaan loo adeegin. Iyadoon xitaa weli la fulin, amarku waa takoorid.

Mar walba oo qofka si dadka kale ka duwan loola dhaqmaa takoorid ma ah. Sharciga sinnaantu wuu ogol yahay in sida caadiga si ka sii fiican loola dhaqmo, dadka asalka ay ka soo jeedaan, da'dooda ama nooca bulshada ay kaga jiraan dartood loo arko inay u baahan yihiin badbaado gaar ah. hadafka ula dhaqanka sida caadiga si ka sii fiican waa inay la sinnaadaan dadka kale waana inay ku salaysan tahay ka tortegidda dhibaatooyin la ogaadey inay takoriddu keento.

- Tusaale ahaan in shaqooyinka qaar la siiyo dadka waddanka u soo guurey oo keliya waa la dhaqan sida caadiga ah ka fiican o raalli laga yahay, haddii la rabo in lagu saxo cilladda sabab la'aanta ah ee laamaha shaqooyinka qaarkood ay dadka ajnebiga ahi si aad ah ugu yar yihiin.

Iyaduna takoorid ma aha, haddii la fuliyo sida uu qabo qorshaha sharciga sinnaantu (qorshaha sinnaanta, fiiri bogga 9-10) ama haddii shaqada la qabanayo darteed loogu baahan yahay waxyaabo iyo aqoon gaar ah.

- Tusaale ahaan artiska ku saabsan jinsiyad gaar ah, dadka metelaya waxaa la dhihi karaa waa inay jinsiyadda la metelayo ka soo jeedaan.

Sidoo kale si gaar ah ula dhaqanka da'da ku salaysan waa la ogol yahay, haddii ay sabab u tahay siyaasadda shaqaalaynta, siyaasadda suuqiga ah ama sababo la xiriira xirfadda ama haddii sida gaarka ee loola dhaqmayo ay sabab u yihiin heerarka da'da sharci ahaan uu qofku u heli karo dhaqaalaha hawlgabka ama shaqa la'aanta ee nidaamka daryeelka bulshada lagu aqbalay.

- Tusaale ahaan xafiisyada shaqadu kharashkooda waxay u isticimaali karaa sidii shaqa la'aanta dhalinyarada loo dhimi lahaa.

4. Waxyaabehee baa sharciga loo isticimaali karaa?

Erayada furaha u ah: *xirfad ku shaqaysasho, shaqaalayn, xaaladaha shaqada, waxbarashada, xubin ka noqoshada, adeegyada arrimaha bulshada iyo caafimaadka, xuquuqda dhaqaale, gurmadka, adeegyada guryeynta iyo kuwa kale*

Sharciga sinnaantu wuxuu si gaar ah wax uga qabtaa takooridda ku salaysan asalka jinsiga. Mabnuucidda takooridda asalka jinsigu waxay gaarsisan tahay heer ka fog mabnuucidda takooridda waxyaabaha kale sababta u yihiin. Mabnuucidda takooridan ee aad u kulul waxaa sabab u ah waxyaabaha uu ka kooban yahay Xeerka Golaha Yurub, kaas oo sal u ah sharciga sinnaanta. Sharcigu wuxuu mabnuucayaa takooridda ama ha ahaato meelaha dowliga ah ama meelaha shicibka ah.

Sharciga sinnaanta waxaa lagu mabnuucayaa nooc walba oo takoorid ah oo halkan lagu magacaabay, *haddi ay sal u tahay*:

1) Waxyaabaha looga baahan yahay si si madax bannaani leh loogu shaqaysto xirfad ama la soo bixidda nolol maalmeedka iyo weliba waxyaabaha looga baahan yahay tageeridda shaqada nolol maalmeed la soo bixidda

- Tusaale ahaan go'aanka lacagta bilowga ah ee taageeridda ganacsigu ama go'aanka u ogolaanshaha ganacsigu ma noqon karo mid takoorid leh.

2) Waxyaabaha salka u ah shaqo u qaadashada, xaaladaha shaqada shuruudaha shaqada iyo weliba kor u dallacidda

- Shaqabixiyuhu ma aha inuu qofkuu shaqada u qaadanayo ku xiro shuruudo ah inuu leeyahay aqoon ama cilmi aan shaqada loogu baahnayn, kuwaas oo ah takoorid.
- Markuu go'aanka uu dadka shaqada ugu qaadanayo gaarayo shaqabixiyuhu ma aha inuu dadka shuruudo kala duduwan ku xiro, haddii aanay jirin sababo cadcad oo xagga shaqada darteed caqligal ah. Tusaale ahaan qofka kaniisadda ka shaqeeya waxaa shuruud looga dhigayaa inuu xubin ka yahay kaniisadda, taasina ma ha takoorid.
- Mabnuucidda takooridu waxay kaloo saamaynaysaa go'aamada la gaaro iyadoo xiriirka shaqadu jiro, sida qaybinta hawsha la qabanayo ama kor u dallacaada.
- Hase ahaatee mushaharka abaal marinta ah ee qofka lagu dhiirigelinayo waa la ogol yahay, haddii waxyaabaha mushaharka abaal marinta ah aanay sal u ahayn waxyaabo sinnaanta lid ku ah.

3) Waxyaabaha ku saabsan waxarashada cilmiga guud iyo cilmiga xirfadaha, kuwaas oo ay ka mid yihiin takhasusidda iyo barashda cilmi cusub, iyo helidda xirfad ku hagaajinta

- Tusaale ahaan qaadashada ardayda, qiimaynta waxbarashada iyo ardayda akhlaaqdooda ma aha inay noqdaan kuwo takoorid leh.

4) Xubin ka noqoshada iyo ka qaybqaadashada hawlaha ururada shaqaalaha iyo ururada shaqabixiyayaasha ama ururada kale ee xirfadaha

Waxyaabahaas waxaa kaloo dheer oo uu sharcigu mabnuucayaa, in qofka jagadiisu gaar noqoto iyadoo *ay sabab u tahay asalka uu ka soo jeedo* , haddii arrintu ku saabsan tahay:

1) Adeegyada arrimaha bulshada iyo caafimaadka

- Degmadu ma aha inay dadka siyaabo kala duwan ugu adeegto iyadoo u eegeysa asalka jinsigiisu ka soo jeedo, tusaale ahaan qabanqaabinta hawlaha sooshalka, xannaano maalmeedka carruurta, daryeelka bukaanka iyo daryeelka caafimaadka shaqaalaha.

2) Dhaqaalaha arrimaha bulshada, u raqiisinta qiimaha iyo faa'iidooyinka dhaqaalaha

- Tusaaleyaal ku saabsan dhaqaalaha arrimaha bulshadu waa lacag maalmeedka bukaanka iyo shaqo la'aanta, lacagta taagerridda ee shaqa la'aanta, lacagta kaalmada ee ijaarka iyo lacagta taageeridda waxbarashada.

3) Ka soo bixidda waajibaadka shaqada gurmadka, gurmadka iskaa wax u qabso ee dumarka iyo shaqa qaranka

- Dadka dhalashada Finland qaatay xagga waajibaadka shaqada gurmadka waxay ula siman yihiin dadka asalkoodu Finnishka yahay.

4) Bixinta adeegyada iyo waxyaabaha manaafacaadka leh

- Adeegga waxaa loola jeedaa marka qof kale loo qabto shaqo rakibaad ah, hagaajin ah, u kaydin ah, meel uga qaadid ah, waxbarid ama talo siin ah iyo weliba tusaale ahaana deegyada hoysiinta. Sidoo kale adeegyada hay'adaha lacagu, sida deyn siinta, iyo adeegyada makhaayaduhu ma aha inay noqdaan kuwo lagu xadidayo asalka uu qofku ka soo jeedo.
- Hase ahaatee mabnuucidda takooriddu ma saamayso waxyaabaha ka dhexdhaca dadka shakhsiyaadka kalegood ah. Tusaale ahaan mabnuucidda takooriddu way saamaysaa xafiisyada xirfad ahaa u furan inay guryaha ijaaraan, ama iibiyaan, laakiin mabnuucidda takooriddu ma saamayso dadka shakhsiyaadka ah ee guri kala ijaaranaya ama kala iibsanaya.

5. Horumarinta sinnaanta

Erayada furaha u ah: *waajibaadka horumarinta sinnaanta, qorshaha sinnaanta, inay dadka naafada ahi helaan fursad ay kaga qaybqaataan*

Sharciga sinnaantu wuxuu ballaarinayaa waajibaadka maamulka shaqaalaha oo ah inay takooridda wax ka qabtaan ayna horumar ku sameeyaan in dadka si isku mid ah loola dhaqmo. Sharcigu wuxuu dhigayaa inay shaqaalaha maamulka waajib ku tahay inay si qorshaysan hawl walba oo ay qabanayaan sinnaanta u horumariyaan. Diyaarinta arrimaha iyo gaaridda go'aamadau waa inay lahaadaa habab loo sameeyo oo taageeraya sinnaanta, shaqaalaha

maamulkuna waa inay wx ka beddelaan waxyaabaha hor istaagaya hirgelidda sinnaanta. Tan oo ah waajibaadka guud ee horumarinta sinnaantu wuxuu khuseeyaa shaqaalaha maamulka ee hay'adaha qaranka iyo kuwa degmooyinka iyo kaniisadaha diimaha ee evankelisluteriyanka iyo ortodoksiga.

Isbeddelka la taaban karo ee sharciga lagu qoray waa shaqaalaha maamulka inay waajib ku tahay inay sameeyaan qorshe sinnaanta ah, taas oo lagu horumarinayo sinnaanta jinsiyadaha kala duwan. Waajibaadku wuxuu saameeyaa shaqaalaha maamulka oo dhan, xitaa kuwa hawshoodu aanay shaqo ku lahayn u adeegidda macaamiisha dadka ka tirsan qolyaha tiro ahaan yar. Hase ahaatee kaniisadaha kor lagu soo xusay loogama baahna inay qorshe sinnaanta ah sameeyaan.

Qorshaha sinnaanta waa inay ku jiraan waxqabadyo, Qorshaha sinnaanta waa inay ku jiraan waxqabadyo, caawinaya inay dadka asalka jinsiyada yar yar iyo kuwa waddanka u soo guureyba u suurowdo inay si sinnaan leh u isticimaalaan shaqaalaha maamulka qorshayaashooda, hagitaankooda iyo adeegyadooda. Waxqabadyadaasi waxay yihiin tusaale ahaan adeegyada turjubaanada, qoraalada oo luuqado kala duwan lagu soo diyaariyey iyo macluumaadka kaleba, adeegyo dadku luuqadahooda hooyo ku heleyaan iyo in horumar lagu sameeyo wargelinta fariimaha ee elektarooniga ah.

Qorshaha sinnaantu wuxuu noqon karaa mid gaar ah ama wuxuu noqon karaa qayb ka mid ah qorshe ama barnaamij kale, sida qorshaha isku xuquuqda ama qorshaha la qabsashada waddanka. Waxyaabaha uu ka koobnaanayo oo faahfaahsan waxaa laga ogaanayaa Wasaaradda Shaqada.

Sharciga sinnaantau wuxuu fiiragaar ah u leeyahay inay dadka naafada ahi helaan fursad ka qaybqaadasho ah. Sida sharcigu dhigayo shaqabixiyayaasha iyo qolyaha waxbarashada qabanqaabiyaa waa inay kor u qaadaan shuruudaha ay dadka naafada ahi ku shaqaaloobayaa ama waxbarashada ku heleyaa. Arrintanna macneheedu waa in taageero gaar ah la siiyo shaqaalaynta iyo helitaanka waxbarasho ee dadka naafada ah, kuwaas oo shaqadooda ama waxbarashadooda ka soo bixi kara haddii nidaam caqligal ah looogu suurogeliyo fulinta xilkooda. Waxay noqon kartaa in goobta shaqada wax laga beddelo si ay qofka ugu sahlanaato ama loo keeno qalab gaar ah oo uu ku shaqeeyo.
Marka la qiyaasayo hababkan qofka shaqada loogu suurogelinayo waxaa la eegayaa kharashka ku baxaya oo kale, xaaladda dhaqaale ee shaqabixiyaha ama meesha waxbarashada bixinaysa jagadooda iyo siday suuragal ugu tahay inay helaan taagero dhaqaale oo ah kharashka ku baxaya isbeddeladda loo baahan yahay.
Tusaale ku saabsan waxyaabaha qabanqaabinta ah ee caqligalka ahi waa in qofka shaqaalaha ah ee kursiga lugaha leh ku socda loo dhiso meel aan jaranjaro lahayn oo uu kursiga la mari karo. Tusaale ahaan in qofka naafada ah ee shaqaalaha ah loo dhiso wiish waa mid aan caqligal loo arki karin, sidaa darteed shaqabixiyaha ama goobta waxbarashada waajib lagagama dhigi karo inay wiish u dhisaan.

6. **Ilaalinta fulinta sharciga**

Erayada furaha u ah: *maamulka badbaadinta shaqaalaha, wakiilka qolyaha tiro ahaan yar, guddiga takooridda*

Ilaalinta in sharciga sinnaanta la fuliyo xagga shaqada waxaa u xilsaaran maamulka badbaadada shaqaalaha, takooridda sababta waxa u ah miday doonto ha noqotee, mar haday tahay sabab sharciga lagu sheegay. Ilaalinta takooridda ay sababta u tahay asalka jinsigu iyo noocyada kale ee takooridda ah ee shaqada ka baxsan (dhaqaalaha arrimaha bulshada, adeegyada iwm.) waxaa u xilsaaran wakiilka qolyaha tiro ahaan yar iyo guddiga takooridda.

Fulinta sharciga sinnaanta waxaa kaloo ilaaliya maxakamaddaha caadiga ah, kuwaas oo laga codsan karo inay falanqeeyaa arrimaha takooridda ag waxaana laga codsan karaa inay qofka takooridda lagu sameeyey u xukumaan xaalmarin.
Shaqabixiyuhu waa inuu xil iska saaraa, in madaxda shaqaalaha iyo go'aamadda goobta shaqadu noqdaan kuwo aan jebinayn sharciga sinnaanta. Maamulka badbaada shaqaaluhu waxay ilaaliyaa siduu shaqabixiyuhu u shaqeey.

Wakiilka qolyaha tiro ahaan yar wuxuu bixin karaa tilmaan, talooyin iyo wax u seegitaan. Wakiilka caawimo ayaa laga codsan karaa si heshiis loo gaaro. Xafiiska wakiilka ayaa arrinta qiyaasa, markuu qofka macaamiisha ah caawinayo.

Qofka takooridda la kulmay ama kan takooridda lagu eedeeyey wuxuu arrinta u gudbin karaa guddiga takordda si ay u falanqeeyaan. Sidoo kale wakiilka qolyaha tiro ahaan yar arrinta wuu u gudbin karaa guddiga takooridda, si ay u falanqeeyaan.

Guddigu waxa lagu heshiiyey bay ansixin karaan ama waxay mabnuucayaan isticimaalidda waxa takooridda keenaya. Guddigu wuxuu kaloo awoodda, in haddi loo baahdo ay qofka takooridda wada ku xukumaan ganaax lacageed oo hanjabaad ah. Guddigu ma joojinayo in habab kale loo dacwoodo, awodna uma laha inay beddelaan go'aamada ay shaqaalaha maamulku gaareen. Guddiga takooriddu wuxuu ka kooban yahay gudoomiye, lix xubnod oo kale iyo xoghayn. (Fiiri lifaaqa 2aad)

7. **Qofka la takooray xaalmarin buu xaq u leeyahay**

Erayada furaha u ah: *mabnuucidda wax kale ku samaynta, xaalmarin, qaybinta caddaynta siday wax u dhaceen*

Sharcigu wuxuu dhigayaa, in aan qofnaba si dadka kale ka duwan loola dhaqmin iyadoo sabab looga dhigayo, maadaama uu ka dacwooday takooridda ama uu la xiriiray shaqaalaha maamulka si sharciga sinnaantu u fulo. Arrintan oo ah mabnuucidda wax kale ku samayntu waxay badbaadinaysaa qofka takooridda lagu sameeyey iyo dadka kale ee isku deyaya inay takooridda wax ka qabtaa, ama inay horumariyaan sinnaanta (tusaale ahaan markhaatiyada, wakiiladda iwm.)

Ciqaabta qofka takooridda sameeya siday awelba ahaayeen bay waxay haddaba ku xiran yihiin sharciga dembiyada. Hase ahaatee sharciga sinnaanta waxaa ku jira waxyaabo dibu cusboonaysiin lagu sameeyey oo la

taaban karo: qofka sharciga jebiya waxaa lagu xukumi karaa inuu xaalmarin siiyo qofka dhibaatada loogu geystey takooridda ama qofka wax lagu sameeyey takooridda oo u ka dacwoodey darteed.
Xaalmarin lama dalban karo, haddii sababta qofka loo takooray ay tahay mid xagga luuqadda ama arrin kale oo qofka la xiriirta, sida heerka uu bulshada kaga jiro ama hantidiisa darteed.
Tan macnaheedu waa tusaale ahaan, qofka Saame ah ee luuqadiisa hooyo loogu adeeggi waaye xaalmarin ma dalban karo.

Guddiga takooridda, wakiilka qolada tiro ahaan yar ama maamulka badbaadada shaqaaluhu ma awoodaan inay qofka u xukumaan xaalmarin, ee qofka takooridda lagu sameeyey waa inuu maxakamadda degmadiisa laba sano gudohood kaga dalbadaa in xaalmarin loo xukumo. Haddii takooriddu ay tahay mid joogto ah, waa in dacwada la geeyaa laba sano gudohood, waxaana laga bilaabayaa wakhtigay dhammaatay.
Haddiise arrintu ku saabsan tahay shaqo u qaadasho dacwada takooridda waa in lagu geeyaa hal sano gudeheed oo ah laga soo bilaabo markuu qofku helay go'aanka ah in qof la shaqaaleeyey.

Dacwada sal loogama dhigi karo dood keliya ee waa in qofka takooridda lagu sameeyey keenaa wax cad oo keenay in la maleeyo inuu takoorid la kulmay. Haddii caddayn ku filan la helo, qofka takooridda looga shakisan yahay waa inuu keenaa cadday uu ku muujinayo, in aanu jebin sharciga takooridda lagu mabnuucayo. Hadafka laga leeyahay qaybinta caddaynta siday wax u dheceen waa in la fududeeyo falanqaynta arrinta iyo la dhiirigeliyo si dad badan dacwadooda takooridda ugu gudbiyaan maxakamadda.

Caddadka ugu badan ee xaalmarintu waa 15000 euro. Marka caddadka xaalmarinta qofka loo xukumayo waxaa la eegeyaa takooriddu noocay ahayd, muddaday socotey, qofka sharciga mabnuucidda takooridda jebiyey siduu ficilkiisa u arko, dadka arrintu khusayso hadday dhexdoodu heshiis dhexdhexaadin ah geereen iyo weliba xaaladda dhaqaale ee qofka ficilka sameeyey. Xaalmarin waa layska dhaafi karaa ama caddadka ugu badan waa laga sii badin karaa haddii loo arko inay wax caqligal ah tahay.

Haddii takooriddu keentay khasaare dhaqaale, qofka takooridda la kulmay wuxuu dalban karaa xaalmarinta iyo weliba magdhow waafaqsan sharciga magdhowga. Arrintanna ma hor istaageyso dalbashada xaalmarinta, sababtoo ah xaalmarintu waa wax uu keenay dhibaatadda loo geystey qofka takooridda lagu sameeyey, ee magdhow uma aha dhibaatada dhaqaale ama nafsad ahaaneed ee qofka loo geystey.

8. **Falanqaynta arrimaha takooridda oo kooban – xaggee wax laga bilaabaa**?

Haddii shaqada, goobaha waxbarashada, adeegyada ama markaad dhaqaalaha arrimaha bulshada dalbanayso ama wax kale oo u dhigma oo ah kuwa sharciga lagu magacaabay takoorid lagugu sameeyo, wadahadal aad la

yeelato qofka takooridda wadaana arrinta wax ka beddeli waayo, keligaa ha noqon: la xiriir qofka madaxda kuugu dhow ah, maamulka badbaadada shaqaalaha, wakiilka qolada tiro ahaan yar ama guddiga takooridda iyo weliba waxa ugu dambeeya oo ah in maxakamadda loo gudbiyo si ay go'aan uga gaarto.
Hoos waxaa ku qoran tusaaleyaal si kooban uga hadlaya falanqaynta waafaqsan nidaamka sharciga sinnaanta ee ay maraan falanqaynta takooridda, hababka abiilka loo qaato iyo jedwalka wakhti ahaan.

A) Dhammaan waxyaabaha salka u ah takooridda: tusaale waxaa loo soo qaatay takooridda shaqada

- *Waxaa la isticimaalaa iyadoo uu heshiiska shaqadu socdo iyo marka la heshiiska la rabo in la baab'iyo.*

    - *Sidee buu qofka sekshiwal ahaan qolyaha tiro ahaan yar ka tirsan arrinta wax uga qaban karaa, haddii uu u arko in dallacaadii loo ballanqaaday sababta uu u heli waayey ay tahayfikrad xumo shaqabixiyuhu aamminsan yahay?*

1. Wadahadal lala yeelanayo qof ka socda maamulka shaqaalaha ama hadday suuragal tahay qofka madaxda ah si arrinta xal loogu helo.

2. Haddii loo baahdo waxaa lala xiriiri karaa maamulka badbaadada shaqaalaha: tilmaamid, talo, in la ogaado siday wax u jiraan oo faahfaahsan.

3. Dacwada xaalmarinta la xiriirta oo maxakamadda degmada loogu gudbinayo *laba sano gudohood* laga bilaabo wakhtigay takooriddu dhacday.

B) Dhammaan waxyaabaha salka u ah takooridda: tusaale waxaa loo soo qaatay takooridda *marka shaqo la dalbanayo*

- *Maxay tahay inuu sameeyo qofka naafada ah ee shaqada dalbaday,haddii aanu shaqadii helin, xitaa isagoo ahaa qof xagga aqoonta xirfadda iyo xagga cilmigaba uu ahaa qofka ugu haboonaa shaqada dadka soo dalbaday?*

1. Macluumaadka ku saabsan go'aanka doorashada (takoorid ah).

2. La xiriirid maamulka badbaadada shaqaalaha: tilmaamid, talo, in la ogaado siday wax u jiraan oo faahfaahsan.

3. Dacwada xaalmarinta la xiriirta oo maxakamadda degmada loogu gudbinayo *hal sano gudeheed* laga bilaabo wakhtiga la healay go'aanka takooridda ah.

C) takooridda ay salka u tahay asalka jinsiga

- Waxaa la isticimaalaa, markay jirto arrin la xiriirta wax kale oo aan ahayn shaqada iyo xiriirka maamulka shaqada.
  - *Muxuu samayn karaa qofka guriga dalbaday, haddii uu u arko in safka guryaha ijaarka ee magaalada loogu jiro lagu takooray asalka jinsigiisa dartis?*

1. qofka la takooray (qofka guriga dalbaday) iyo qofka wax takooray (qolada guryaha bixisa) ayaa wada xiriiraya si ay arrinta xal ugu helaan.

2. Waxaa lala xiriirayaa wakiilka qolyaha tiro ahaan yar: tilmaamid, talooyin, waxs u soo jeedin, waxyaabaha kale ee ay tahay in la sameeyo si xal heshiis dhexdhexaadin ah loo helo, tusaale ahaan shirar.

3. Arrinta oo loo gudbinayo guddiga takooridda: warbixin, ansixinta heshiiska dhexdhexaadinta, mabnuucidda ah in arrintan takooridda keeneysa la joojiyo, ganaax lacageed oo hanjabaad ah.

4. Dacwada xaalmarinta la xiriirta oo maxakamadda degmada loogu gudbinayo *laba sano gudohood* laga bilaabo wakhtigay takooriddu dhacday.

9. Faahfaahin dheeraad ah

Sharciga sinnaanta waxaad ka akhrisan kartaa cinwaanka internetka ee **http://www.finlex.fi/linkit/sd/20040021**

Sharciga sinnaanta waxaa laga qoray buug yar (opas) oo loogu talagalay shaqaalaha maamulka, buugga waxaa ku qoran faahfaahin dheeraad ah oo sharciga ku saabsan iyo waxyaabaha lagu dabikhi karo. Buugaas iyo qoraalkanba waxaa laga dalban karaa Wasaaradda Shaqada cinwaankeeda o ah: Työministeriö/ MT-tiimi, PL 34, 00023 VALTIONEUVOSTO. Waxaad kaloo ka heli kartaa boggaga internetka ee mashruuca wargelinta la dagaalanka takooridda (SEIS- tiedotushanke) **http://www.join.fi/seis/**

Takooridda ku saabsan shaqada iyo jagooyinka shaqada caawimada ugu dhakhsaha badan iyo wixii warar ahba waxaad heleysaa haddii aad la xiriirto hay'adda deegaankaaga u qaabilsan badbaadada shaqaalaha (työsuojelupiiri). Hay'adaha badbaadada shaqaaluhu waa siddeed:

Hämeen työsuojelupiiri, tel. 03-2608 800, tampere.tsp@tsp.stm.vn.fi
Itä-Suomen työsuojelupiiri, tel. 017-201 401, ita-suomi.tsp@tsp.stm.vn.fi
Kaakkois-Suomen työsuojelupiiri, tel. 05-6264 100,
lappeenranta.tsp@tsp.stm.vn.fi
Keski-Suomen työsuojelupiiri, tel. 014-697 211, jyvaskyla.tsp@tsp.stm.vn.fi
Pohjois-Suomen työsuojelupiiri, tel. 08-3159 511, oulu.tsp@tsp.stm.vn.fi
Turun ja Porin työsuojelupiiri, tel. 02-2715 777, turku.tsp@tsp.stm.vn.fi
Uudenmaan työsuojelupiiri, tel. 09-774 711, helsinki.tsp@tsp.stm.vn.fi
Vaasan työsuojelupiiri, tel. 020 1236 200, vaasa.tsp@tsp.stm.vn.fi

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan hay'adaha badbaadada shaqaalaha waxaad ka heleysaa cinwaanka internetka **http://www.tyosuojelu.fi**.

Arrimaha kale ee takooridda jinsiyada ah waxaad la xiriiraysaa Xafiska wakiilka dadka tirada yar (vähemmistövaltuutetun toimisto, tel. 09- 160 470 48, e-mail: vahemmistovaltuutetun.toimisto@mol.fi

Cinwaanka guddiga takooridda:
Syrjintälautakunta
PL 34
00023 VALTIONEUVOSTO

E-mailka guddiga takooridda: syrjintalautakunta@mol.fi

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan guddiga takooridda waxaad ka heleysaa cinwaanka internetka **www.mol.fi/syrjintalautakunta/**

Lifaaqa 1aad

Fikrado ku saabsan sharciga sinnaanta – saddex tusaale

habka sharciga sinnaanta loo dejiyey baaba marka ugu horaysa waxay tahay inuu noqdo qalab shaqo, qalabkaas isagoo kaashanaya ayuu qofka takooridda la kulmay wax ka qabanayaa sida xun ee loola dhaqmay.
saddexda qof ee hoos ku qoran waxay sheegayaan, siday u arkaan fursadaha sharcigu laga helayo, siday tahay in sharciga looga faa'iideysto iyo siday la tahay inuu uga hortegayo takooridda.

1. Ma loo baahnaa sharci cusub?

Xoghaye guud Jussi Nissinen, Seksuaalinen tasavertaisuus SETA ry.
"Sharciga sinnaanta baahi cad baa loo qabey. In mabnuucidda takooridda lagu dabakho sharciga dembiyadu aad bay u adkayd. Sharciga sinnaantu wuxuu leeyahay habab badan oo takooridda wax lagag qaban karo."

Xoghaye guud Pirkko Mahlamäki, Ururka Naafadda (Vammaisfoorumi ry).
"Sharciga waa loo baahan yahay, sababtoo ah mabnuucidda takooridda ee dastuurka ku taalla ilaa hadda sidii la rabey loogu furfurin dejinta sharciyada khaaska ah."

Gudoomiye Pekka Aikio, Golaha Saamiga
"Sharciga sinnaantu aad buu lagama maarmaan u yahay. Wuxuuna xal cusub u noqonayaa sidii takooridda nolol maalmeedka ah ee inta badan la dareemin loo ciribtiri lahaa."

2. Maxay yihiin meelaha uu sharcigu ka fiican yahay iyo meelaha uu ka liito?

Jussi Nissinen
"Waa midda koowaade qaybinta xilka caddaynta waxa dhacay oo labada dhinac loo qaybiyey waa arrin muhiim ah. Midda labaad ee sharcigu ku fiican yahay waa, wuxuu qeexayaa oo shaaca ka qaadayaa waajibaadka saaran maamulka badbaadada shaqaalaha iyo hawsha ugu muhiimsan ee arrimaha takooridda. waa midda saddexaade way fiican tahay in erayga qashqashaadid (häirintä) uu sharciga ku qoran yahay, taas oo keenaysa in sidii hore si ka fiican wax looga qaban karo qashqashaadidda. Meeshuu sharcigu ka liito waa waxyaabaha takooridda salka u ah jago ahaan sharciga isku qiimo ma aha. Tusaale ahaan xagga adeegga sharcigu wuxuu saameeyaa takooridda asalka jinsiga ah ku salaysan oo keliya, hawsha wakiilka dadka tiro ahaan yar iyo hawsha guddiga takooriddu waxay la xiriiraan takooridda asalka jinsiga ah ku salaysan oo keliya."

Pirkko Mahlamäki
”Sharciga sinnaantii wuxuu bilow u yahay waddadii lagu gaar lahaa sinnaan dhab ah. Sinnaanta waxaa inta badan loo fahmaa sinnaanta ragga iyo dumarka dhexdooda oo keliya, laakiin sharciga sinnaantu wuxuu caddaynayaa in qolyaha kale ee yaryari hoos imaanayaan macnaha erayga. Waxaa kaloo intaa dheer sharcigu wuxuu sharciyadeena qaranka ku soo kordhinayaa xeerarka Midowga Yurub oo inta badan dhadka caadiga ahi dhib u arkaan, sharcigu wuxuu kaloo leeyahay hawlo waxqabad gaar ah oo wanaagsan oo kobcinaya jagada qolyaha tirada yari ku leeyihiin ulshada.
Waxaannu aad uga fekerney, muxuu yahay waxa la taaban karo ee sharcigu u tarayo naafadda. Sharciga waxaa lagu carrabaabay, in haddii loo baahdo ay tahay in ilaa xad caqligal ah la sameeyo sidii kor loogu qaadi lahaa fursadda uu qofka naafada ahi ku heli lahaa waxbarasho ama shaqo. Erayga caqligal sidiisaba ma aha mid cad oo sugan, waxa shakiga keenayaana waa midda ah, sideedaba si uu qofku u helo xuquuqdiisa aasaasiga ah miyaa loo baahan yahay in aragtidda caqligal meesha la soo geliyo.”

Pekka Aikio
”Sharcigu wuxuu taageerayaa xuquuqda ay dadka Saamegu u leeyihiin jinsiyadooda iyo dhaqankooda. Waxaa gaar ahaan arrin fiican ah, sharcigu wuxuu si fiican u kala saarayaa farqiga u dhexeeya takooridda iyo waxqabadaka ah ula dhaqanka si gaar ah oo sida caadiga si ka fiican, taas oo suuragelinaysa in la taageero dadka xaaladoodu liidato.
Waxaa kaloo iyaduna arrin wanaagsan ah waajibaadka maamulka saaran ee ah inay sameeyaan qorshe ay kula dagaalamayaan oo ku baabi’inayaa takooridda. Waxaanan rajeynayaa in qorshayaasha la sameeyo oo la isticimaalo. Qorshayaashana waa inay ku jiraan in la dhaqanka sida caadiga ah ka fiican ee dadka saamega ah lagu taageerayo aan la baabi’inin si jagada ay bulshada ku leeyihiin loo hagaajiyo isla markaasna hab nololeedka dadka Saamega oo ay noloshooda kula soo baxaan uu u sii jiro.
Waxyaabaha luuqadda ku salaysan ee sharcigan la aqbalay ka maqan waxaa sabab u ah arrin dhaqaale, waxaanse rajeynayaa inay si tartiib tartiib ah yana u saxmi doonto.”

3. Waa nocee takooridda nolol maalmeedka caadiga ah, sharciguse wax faa’iido ah ma leeyahay si takooridda loo baabi’iyo?

Jussi Nissinen
”Takooridda ay dadka sekshiwal ahaan tirada yari la kulmaan inta badan waa mid dahsoon oo aan toos ahayn, sidaa darteed in la caddeeyo aad bay u adag tahay. Takooriddu aad bay ugu badan tahay goobaha shaqada.
Hadda waxaa muhiim ah inay dadku ogaadaan waxyaabaha uu sharciga sinnaantu ka kooban yahay iyo fursadaha suuragalka ah ee sharcigu leeyahay, si aanu u noqon qoraal dhintay. Waxaan rajeynayaa in sharciga laga faa’iideysto oo la isticimaalo, dadkuna u fiirsadaan ficilkay samaynayaan iyo dad la dhaqanka ay dadka kale kala kulmaanba.”

Pirkko Mahlamäki

”Dadka naafada ahi takooridda maalin walba way la kulmaan; inta badana takooriday la kulmaan waa mid ah, in aanay tegi karin meeshay u baahnaayeen. Takooriddu inta badan waxay ku dhisan tahay waxyaabaha ay dadku aamminsan yihiin, sidaa darteed way adag tahay in wax laga qabto. Waxaa jira dad badan oo takooridda iskala qabsaday oo aan xitaa dareemayn in takoorid lagu sameeyey. Dad badan oo aqoon leh baa guriga iska fadhiya naafanimadooda darteed, umana suuroobays inay aqoontooda soo bandhigaan. Waxaan filayaa, inuu sharcigu dadka firfircoonidoda kicinayo, laakiin waxyaabaha dadku ay rajeynayaan way ka badan yihin waxyaabaha uu sharcigu awoodo.”

Pekka Aikio

”Hababka ay dadka Saamegu noloshooda kula soo baxaan ee ay asalka u leeyihiin sida, xayawaanka booroda ee ay dhaqdaan (poronhoito) iyo kalluumaysigu sharciga Finland jagaday kaga jiraan waa mid takooran. Takooridda ay dadka Saamegu la kulmaan waa mid dhaqaale oo qaabka bulshadu u dhisan tahay ku salaysanwaxayna takooridaasi ku timaadaa hababkan ay nolosha kula soo baxaan. Laamaha wararka ee saxaafaddu dadka Saamega ah waxay ka bixiyaan sawir xun ha ahaadeen barnaamijyada wararka ah ama barnaamijyada madadaalada ahba, taasoo iyana abuurta deegaan colaadeed. Dadka Saamega ahi carruurtooda uma helaan barnaamijyada carruurta oo luuqaddooda ah, haddii loo baahdana waxaa laga heli karaa Norway.

Hababka caadada u ah inay dadka Saamega noloshooda kula soo baxaan xagga luuqadda Saamega waa qaninimo, sidaa darteed waa muhiim in qadarin la siiyo. Dadka caadiga ah ee Saamega ah noloshooda aanay ku xirnayn booro dhaqashada kuma sugna khatar weyn oo xagga takooridda ah, sababtoo ah bulshada inteeda kale ayey aad u dhexgaleen.

Waxaan aamminsanahay, in sharcigan sinnaantu faa’iido u yahay dadka Saamega ah ee weli noloshooda ka hela hababka dadkaas caadada u ahaan jirey wuxuuna xoojinayaa jagada ay bulshada ku leeyihiin iyo xuquuqdooda.”

Lifaaqa 2aad

Xubnaha guddiga takooridda

Guddiga takooridda ee ugu horeeyey waxaa hawshooda loo magacaabay 19. Febaraayo 2004. Muddada guddigu shaqaynayaa waa afar sano.

Gudoomiyaha guddiga takooriddu waa xildhibaan sharcidejiye ah oo haysta shahaadada jaamacadda ee sharciyaqaanka ugu saraysa (lainsäädäntöneuvos, oikeustieteen tohtori) Jukka Lindstedt wuxuuna ka socdaa Wasaaradda Caddaalada, gudoomiye ku xigeenku waa xeerilaliyaha deegaanka Helsinki waana qareen sharci yaqaan (Helsingin kihlakunnansyyttäjä, varatuomari) Vilja Kutvonen. Xoghaynta guddigu waa qareen sharciyaqaan (varatuomari) Tapio Susi oo Wasaaradda Shaqada ka socda.

Xubnaha kale ee guddiga:

Markku Fredman, Xafiiska Qareemada ee Fredman & Månsson Oy (Asianajotoimisto Fredman & Månsson Oy)
Thea Lång, Maxakamadda Gobolka ee Helsinki (Helsingin hovioikeus)
Juhani Kortteinen, Jaamacadda Helsinki (Helsingin yliopisto)
Inga Jasinskaja-Lahti, Jaamacadda Helsinki (Helsingin yliopisto)
Adrián Soto, weriye (toimittaja)

Xubnaha ku simayaasha:

Marja Vanamo, Xafiiska xeerilaaliyaha ee deegaanka Joensuu (Joensuun kihlakunnan syyttäjänvirasto)
Kirsi Tarvainen, Xafiiska Qareemada ee Asianaiset (Asianajotoimisto Asianaiset)
Jukka Rainio, (Maxakamadda Tuusula) Tuusulan käräjäoikeus
Timo Makkonen, Macadka Xuquuqda Bini-aadanka ee Akadeemiyada Åbo (Åbo Akademin Ihmisoikeusinstituutti)
Karmela Liebkind, Jaamacadda Helsinki (Helsingin yliopisto)
Ahmed Akar, Xarunta Dhaqamada Caalamiga ee Caisa (Kansainvälinen kulttuurikeskus Caisa)